Galbeedka Australiya “Waxaan u baahanahay Kaarka Turjumaanka”
Macluumaadka Bulshooyinka

Haddii ay kugu adkaato inaad Ingiriiska ku hadasho, kaarkan ayaa u ogolaanaya hay’adaha Dawlada inay ogaadaan inaad u baahan tahay turjumaan.

Sidee baan u isticmaalaa kaarka?

Qor magaca luuqada aad ku hadashid ama ku isticmaal kaarka xaggiisa hore Ingiriis. Haddii aad ku hadashid ama isticmaashid hal luuqad wax ka badan, qor luuqadaha kale kaarka adoo isugu xigsiinayaa nidaamka ah ta ugu xoogan ilaa ta ugu xoogga daran. weydii qofka ku siiyey kaarka inuu tan kaa caawiyo haddii ay lagama maarmaan tahay.

Hadii aad u baahan tahay caawimaada turjumaan markaad isticmaaleyso adeega Dawlada, tus kaarkaaga xubinta shaqaalaha ka midka ah. Waxay iskudeyi doonaan inay turjumaan kuu qabtaan (midkood qof ahaan ama taleefanka) oo ku hadla luuqadaada.

Haddii turjumaan ku hadla luuqadaada koowaad aan la heli Karin, xubin shaqaalaha ka mid ah ayaa isku deyi doonta inay hesho turjumaan ku hadla luuqadaada labaad ama ta saddexaad.

Yaa heli kara Kaarka Turjumaanka ?

Cid kasta oo u baahan in laga caawiyo inay Ingiriis ku hadasho markay isticmaalayaan adeegyada Dawlada wuu heli karaa kaar.

Waa imisa qiimaha kaarku?

Kaarku waa bilaash. Haddii aad lumiso kaarkaaga, waxaad ku heli kartaa mid cusub bilaash.

Xaggee baan ka heli karaa kaar?

Kaararka waxaa laga helayaa xarumaha ilaha macluumaadka soogalootiga, adeeg bixiyayaasha bulshada dhaqamada badan, qaar ka mid ah isbitaalada dadweynaha, Dugsiyada leh Xarumaha Ingiriiska degdega ah, qaar ka mid ah hay’adaha qaar ka mid ah dawlada hoose, Ururka Dhagoolayaasha ee WA iyo Adeega Turjumaanka Kimberley.

Ilaa intee Ayaan kaarkan isticmaali karaa?

Waad isticmaali kartaa kaarka ilaa intaad u baahan tahay caawimaada turjumaada si aad u isticmaashid adeegyada Dawlada. Ma laha taariikh dhicitaan.

Dad kale ma isticmaali karaan kaarkeyga?

cid kasta oo ku hadasha ama isticmaasha luuqadaada waa isticmaali kartaa kaarkaaga, oo ay ku jiraan xubnaha qoyskaaga.

Ma weydiisan karaa turjumaan haddii aanan haysan kaar?

Haa. Waxaad weli weydiinsan kartaa turjumaan hay'adaha Dawlada xitaa haddii aadan heysan kaar.

Turjumaanka ma anigaa bixinaya?

Maya. Haddii aad xaq u leedahay isticmaalka adeega Dawlada, hay'ada ayaa turjumaanka lacagtiisa bixineysa.

Ma weydiisan karaa turjumaan dumar ah ama rag?

Waxaad weydiisan kartaa turjumaan dumar ah ama rag. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaysan suurta gal ahayn in lagu siiyo codsigaaga.

Ma weydiisan karaa xubin qoyska ah ama saaxiib inuu ii turjumo?

Tan laguma talinayo, bixinta macluumaadka aasaasiga ah mooyee ama xaaladaha laga soo reebayo.

Saaxiibada ama xubnaha qoyska waxay noqon karaan kuwo ay caadifad qaado, waxaana laga yaabaa inaysan lahayn xirfado lagama maarmaan ah iyo dhexdhexaadnimo. cid kasta oo ka yar 18 sanno waa inaan la weydiin inay turjumaan.

Miyaan hore u ogeysiiyaa adeega inaan u baahan doono turjumaan?

Haa, inay tahay xaalad degdeg ah mooyee, waxaa wanaagsan inaad shaqaalaha hore u ogeysiiso inaad u baahan tahay turjumaan si ay u sameeyaan qabanqaabada lagama maarmaanka ah.

Ka waran hadii aanan shaqaalaha hore ugu sheegin inaan u baahanahay turjumaan?

Shaqaaluhu waxay sameyn doonaan sida ugu wanaagsan ee ay kuu caawin karaan. Tusaale, waxaa laga yaabaa inay:

- Isticmaalaan turjumaanka taleefanka , haddii aan la heli Karin turjumaan yimaada;
- sameeyaan wakhti cusub oo aad soo booqato marka turjumaan la heli doono;
- ku siiyaan macluumaad ku qoran luuqad aad akhrin kartid , haddii la heli karo; ama
- isticmaalaan xubin shaqaalo ah oo ku hadasha luuqadaada, haddii mid la helayo, si aad u hesho waxoogaa macluumaad aasaasi ah, si aad u caawisid in turjumaan laguu balamiyo.

Maxaan sameyn karaa haddii codsigayga turjumaanka la diido?

Xaaladaha qaarkood hay'ada waxaa laga yaabaa inaysan kuu qaban turjumaan laakiinse waxaa laga yaabaa inay isku dayaan siyaalo kale (tusaale, ku bixinta macluumaadka luuqad aad akhrin karto. Si kastaba ha ahaatee fadlan wargeli hay'ada haddii aadan awoodin inaad wax ku akhriso luuqadaada.)

Haddii aad u baahan tahay turjumaad oo aad mid weydiisatay laakiinse hay'adu ay diidey, waxaad cabasho u gudbin kartaa hay'adaas.

Haddii aadan ku qanacsaneyn jawaabta hay'ada waxaad la xiriiri kartaa *Ombudsman ka Western Australia* 9220 7555 ama iimeyl mail@ombudsman.wa.gov.au. Waxaad ku sameyn kartaa tan luuqadaada.

Xaggee baan ku isticmaali karaa kaarka Turjumaanka?

Iyadoo ku xiran waxaad dooneysid inaad ka hadashid, hay'adaha dawladu waa inay go'aamiyaan wakhti kasta haddii turjumaan khasab tahay ama laga yaabo in la isticmaalo . waxaa looga baahan yahay inay isticmaalaan turjumaan meeshii xuquuqdaada, caafimaadkaaga iyo ammaankaagu khatar ku jiro. Hay'adaha dawlada ee aadka ugu eg inay isticmaalaan turjumaan waxaa ka mid ah:

- isbitaalada dadweynaha
- saldhigyada booliiska
- maxkamada iyo taraybuunaalka sharciga
- dugsiyada gobolka
- xafiisyada guryaha dadweynaha
- xafiisyada dawlada hoose

waa inaad sidoo kale hubisaa haddii xaafadaadu leedahay wax dhakhtaro ah iyo farmasiiyayaal oo qaata adeegyada turjumaada bilaashka ah ee ay maalgelisay Wasaaradda Adeegyada Bulshada.

Haddii aad dhego la'a dahay ama maqalku kugu adag yahay,waxaa laguu qabanayaa turjubaanada Auslan ka balamaha caafimaadka gaarka ah Adeega Lacagbixinta iyo Balaminta Auslan ka Qaranka (NABS) iyadoo uusan wax kharash ah kugu joogeynin. NABS waxaa lagala xiriiri karaa website –kooda ah: www.nabs.org.au

Xaggee baanan ku isticmaali karin Kaarkeyga Turjumaanka?

Meheradaha kale iyo adeegyada ganacsiga ma kuu qaban doonaan turjumaan.

Ururada sida isbitaalada gaarka ah iyo rugaha caafimaadka , dugsiyada gaarka ah, adeegyada sharciga ee gaarka ah iyo shirkadaha gaadiidka gaarka ah waxaa laga yaabaa inay doonayaan turjumaan inay kuu qabtaan , laakiinse waxaa laga yaabaa inay ku yiraahdaan waa inaad bixisaa lacagta isticmaalka turjumaanka.

Haddii aad Dhagoole tahay ama maqalku kugu adag yahay, kuwa bixiya waxbarashada gaarka ah waxaa laga doonayaa inay kuu qabtaan turjumaan sida waafaqsan Xeerka Takoorida Dadka Iinta leh (Heerarka Waxbarashada).

Buugyarahan oo lagu turjubaanay luuqado dhawr ah, iyo macluumaadka ku saabsan Qorshaha Adeegyada Luuqada ee Galbeedka Australiya, waxaa laga helayaa website ka Danta Xafiiska Dhaqamada badan www.omi.wa.gov.au.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir Danta Xafiiska Dhaqamada badan, Wasaaradda Bulshooyinka iyo Dawlada Hoose, 6552 8700.

Garowsi: Xafiiska Danta Dhaqamada badan wuxuu garowsaday ogolaansha Golaha Dhaqamada badan ee Victoria inay wax ka bedelaan buugyaraha Kaarka Turjumaanka Victoria si loogu isticmaalo Galbeedka Australiya.